

# Carbapenem-Resistant *Acinetobacter baumannii* (CRAB)



CRAB waa bakteeriyo ku faafta xarumaha daryeelka caafimaadka wayna adkaan kartaa in la daweeyo.

## WAA Maxay CRAB?

- CRAB waa nooc bakteeriyada kamid ah oo keeni karta caabuqyo xun.

## MAXAY khubaradu uga walaacsan yihiin? MAXAAN ugu baahan nahay inaan ka walwalno?

- CRAB way adkaan kartaa in la daweeyo waayo badanaa ka maraan daawooyinka bakteeriyada dila.
- Wuxuu si fudud iskaga gudbaa dadka, ama goobaha bakteeriyada leh iyo qalabka caafimaadka ee la wadaago.
- Inta badan dadka qaba CRAB ayaan lahayn wax astaamo ah ama calaamado ah; tan waxaa loogu yeeraa colonization (guumaysi cudur).
- Caabuqyada CRAB ayay adkaan kartaa in la daweeyo waxayna keeni karaan xanuun daran ama dhimasho.

## YAA khatarta ugu wayn ugu jira qaadista CRAB?

- Dadka jooga xarumaha daryeelka caafimaadka ee qaba dhaawacyada furan ama tuubooyinka la gasho jirka (tusaale, tuubooyinka quuddinta, tuubooyinka neefsiga, iyo tuubada dhuunta).
- Dadka nidaamyada difaaca jirkood uu liito.
- Waxyaabaha khatarta kordhinaaya waxaa kamid ah qabista taariikhda xanuunada badan, qaliinka dhawaa, ama nabarada badan ee maqaarka.
- Dadka caafimaadka qaba ayay yar tahay fursada qaadista CRAB.

## SIDEE uga difaaci karaa bukaanadeena CRAB?

- Adeegso kahortagyada taabashada (tusaale, nadaafada gacmaha, shuluga caafimaadka, iyo gacmo gashiyada) marka aad daryeel siinayso qof lagu ogyahay ama looga shakiyay CRAB.
- Si adag jeermiska uga dil goobaha iyo qalabka caafimaadka.
- Mar kasta raac tilmaamaha keli-yeelida ee ku qoran qolka bukaanka.

## XAGEE ayaan ka heli karaa xog dheeri ah?

- [www.sdhai.org](http://www.sdhai.org)

9/22/2023